DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
GARYAQAANKA GUUD

ولاية بونت لاند
الصومالية
مكتب
المحامي العام للدولة

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE SOLICITOR GENERAL

| SANADKA 26AAD | CADADKA 1AAD | TAARIIKH: 11/1/26 | Lam. 02 |
|---|---|---|---|

## FAAFINTA RASMIGA AH

## OFFICIAL GAZETTE

## الجريدة الرسمية

**Ansixinta Sharciga Hay'adda Maaliyada gaarka loo leeyahay ee Dowladda Puntland**

| TUSMADA | |
|---|---|
| **Qeybta 1aad** | *Xeerarka Baarlamaanka iyo Heshiisyada Caalamiga ah*<br>**Ansixinta Sharciga Hay'adda Maaliyada gaarka loo leeyahay ee Dowladda Puntland** |
| **Qeybta 2aad** | *Xeerarka iyo Digreetooyinka Madaxweynaha.*<br><br>*WAXBA MALEH* |
| **Qeybta 3aad** | *Xeer Nidaamiyeyaasha Wasaaradaha, Xeerarka Goleyaasha Deegaanka iyo Barnaamijyada Dowladda.*<br><br>*WAXBA MALEH* |
| **Qeybta 4aad** | Go'aanmada Maamulada iyo Qaraarada Maxkamadaha.<br><br>WAXBA MALEH |
| **Qeybta 5aad** | Amarada, Ogeysiisyada iyo Qandaraasyada Dowladda.<br><br>WAXBA MALEH |

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

XAFIISKA
MADAXWEYNAHA

ولاية بونت لاند
الصومالية

مكتب
الرئيس

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

**Sharci Lr. 002 ee 11-ka January 2026, kuna saabsan Ansixinta Sharciga Hay'adda Maaliyadda gaarka loo leeyahay ee Dowladda Puntland.**

**Madaxweynaha Dowladda Puntland**

**Markuu arkay:** Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 80-aad farqadiisa 16-aad.

**Markuu arkay:** Ansixinta Golaha Wakiilada Dowladda Puntland ee Summadeedu tahay XGGW/DPL/48/2025, kuna taariikhaysan 13-ka Deseember 2025.

**Markuu Tixgeliyey:** Baahida loo qabo Ansixinta Sharciga Maaliyadda gaarka loo leeyahay eeDowladda Puntland.

**Wuxuu soo saaray**

**Sharciga soo socda:**

**Qodobka 1aad**

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Ansixinta Sharciga Maaliyadda gaarka loo leeyahay ee Dowladda Puntland.

**Qodobka 2aad**

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda

**Qodobka 3aad**

Dhaqangalka Sharcigani wuxuu noqonayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland

**Siciid Cabdullaahi Deni**
Madaxweynaha Dawladda Puntland

Office of the President Puntland State of Somalia

Tell: +252-090-7794468; E-mail: dg.oop@plstate.so, oop@plstate.so; Website: www.plstate.so

**DAWLADDA PUNTLAND**
**EE SOOMAALIYA**
**GOLAHA WAKIILLADA**

**ولاية بو نت لاند الصومال**
**مجلس النواب**

**Xafiiska Guddoomiyaha**
**Office of the Speaker**

**Tix:-XGGW/DPL/48/2025** **Garoowe, Sabti, Taariikh: - 13/12/2025**

**Ku: - Madaxweynaha DPL**

**Garoowe**

Ujeeddo:-**Ansixinta Xeerka Ha'yadaha Maaliyadda Ee Gaarka loo leeyahay**

**Mudane Madaxweyne,**

**GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADU: -**

**MARKUU ARKAY:-** Qodobada **60-aad (1), 64-aad (1), 68-aad(t)** iyo **70-aad (1)** ee Dastuurka Dawladda Puntland.

**MARKUU ARKAY:-** Qodobadda **2-aad (1), 3-aad (1), 57-aad(2)** iyo **58-aad** ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiillada Dawladda Puntland.

**MARKUU ARKAY:-** Soo gudbinta Madaxweynaha Ref: MW/DPS/129/2023 ee July 22, 2023, kuna saabsan Xeerka Hay'adaha Maaliyadeed ee Puntland.

**MARKUU TIX-GELIYEY: -** Muhiimadda ay leedahay samaynta Xeerka Hay'adaha Maaliyadda Gaarka loo leeyahay ee Puntland.

**MARKUU ARKAY: -** Dooddii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu kalfadhiga 57-aad fadhigiisii 8-aad ee 04.11.2025 uu ku Ansixiyey Xeerka Hay'adaha Maaliyadda Gaarka loo leeyahay ee Puntland. Guntanka Fadhiga oo ahaa **(38)** Mudane, waxaa ugu codeeyey oggol **(30)** Mudane, Diidmo **(2)** Mudane, halka ay ka aamuseen **(6)** Mudane.

**WUXUU GUDDOOMIYEY: -**

**Ansixinta Xeerka Hay'adaha Maaliyadeed ee Gaarka loo leeyahay Ee Puntland.**

**Wada Shaqeyn Wacan**

**Md. Cabdirisaaq Axmed Siciid**
**Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.**

XAFIISKA GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADA DAWLADDA PUNTLAND
OFFICE OF THE SPEAKER OF PUNTLAND STATE HOUSE OF REPRESENTATIVES

# DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA
# GOLAHA WAKIILLADA PUNTLAND

---

# XEERKA HAY'ADAHA MAALIYADDA PUNTLAND

Garoowe, November 2025

# TUSMO


CUTUBKA 1AAD ....................................................................................... 1
QODOBO GUUD ....................................................................................... 1
Qodobka 1-aad ....................................................................................... 1
Magaca Xeerka ....................................................................................... 1
Qodobka 2-aad ....................................................................................... 1
Eray Bixin ....................................................................................... 1
Qodobka 3-aad ....................................................................................... 3
Ujeeddada Xeerka ....................................................................................... 3
Qodobka 4-aad ....................................................................................... 4
Baaxadda Xeerka ....................................................................................... 4
CUTUBKA 2-AAD ....................................................................................... 4
AWOODAHA BANKIGA DAWLADDA PUNTLAND ....................................................................................... 4
Qodobka 5-aad ....................................................................................... 4
Qiimeynta Heerka Raasumaalka ....................................................................................... 4
Qodobka 6-aad ....................................................................................... 4
Dib-u-eegista Xisaabaadka ....................................................................................... 4
iyo Warbixinnada Maaliyadeed ....................................................................................... 4
Qodobka 7-aad ....................................................................................... 4
Kormeerka Nidaamka Gudaha ....................................................................................... 4
iyo Maareynta Khataraha ....................................................................................... 4
Qodobka 8-aad ....................................................................................... 5
Hawl-gallada Joogtada ah ....................................................................................... 5
Qodobka 9-aad ....................................................................................... 5
Xakameynta iyo Oggolaanshaha ....................................................................................... 5
Qodobka 10-aad ....................................................................................... 5
Kordhinta ama Dhimista Saami Muhiim ah ....................................................................................... 5
Qodobka 11-aad ....................................................................................... 5
Tallaabooyin Maamul ....................................................................................... 5

CUTUBKA 3-AAD ........................................ 6
DIIWAANGELINTA IYO RUQSADSIINTA ........................................ 6
Qodobka 12-aad ........................................ 6
Noocyada Shatiyada ........................................ 6
Qodobka 13-aad ........................................ 7
Shuruudaha Shati Bixinta ........................................ 7
Qodobka 14-aad ........................................ 7
Soo Saarista Shatiga ........................................ 7
Qodobka 15-aad ........................................ 8
Diiwaanka Hay'adaha Maaliyadda ........................................ 8
Qodobka 16-aad ........................................ 8
Banki Ajnabi ........................................ 8
Qodobka 17-aad ........................................ 8
Kala Noqoshada Shatiga ........................................ 8
CUTUBKA 4AAD ........................................ 9
FEEJIGNAANTA IYO XAKAMAYNTA MAALIYADEED ........................................ 9
Qodobka 18-aad ........................................ 9
Raasumaalka ........................................ 9
Qodobka 19-aad ........................................ 10
Xaddidaadda Amaahda iyo Maalgashiga ........................................ 10
Qodobka 20-aad ........................................ 10
Xaddidaadaha Bixinta Faa'iidada Saamiyada ........................................ 10
Qodobka 21-aad ........................................ 11
Xadka Lahaanshaha Saamiyada ........................................ 11
Qodobka 22-aad ........................................ 11
Shuruudaha Lahaanshaha Saamiyada ........................................ 11
Qodobka 23-aad ........................................ 12
Codsiga Habraaca Wareejinta Saamiyada ........................................ 12
Qodobka 24-aad ........................................ 12
Mamnuucidda Diiwaangelinta Saamiyo Cid Kale ........................................ 12
Qodobka 25-aad ........................................ 12

Saamiyada Magac Kale Ku Qoran ........ 12
Qodobka 26-aad ........ 13
Lacagaha Sharci-darrada ah ........ 13
Qodobka 27-aad ........ 13
Xaddidaadda ........ 13
CUTUBKA 5AAD ........ 13
WAAJIBAADKA HAY'ADAHA MAALIYADDA ........ 13
Qodobka 28-aad ........ 13
Bixinta Adeegyo Maaliyadeed oo Hufan ........ 13
Qodobka 29-aad ........ 14
Ilaalinta Xogta iyo Lacagaha Macaamiisha ........ 14
Qodobka 30-aad ........ 14
Kormeerka iyo Maareynta Khatarta ........ 14
Qodobka 31-aad ........ 14
U Hoggaansanaanta Xeerarka ........ 14
Qodobka 32-aad ........ 14
Daah-furnaan iyo La Xisaabtan ........ 14
Qodobk 33-aad ........ 15
Horumarinta Macaamiisha iyo Bulshada ........ 15
Qodobka 34-aad ........ 15
Horumarinta Tiknoolajiyadda ........ 15
Qodobka 35-aad ........ 15
Gelitaanka Nidaamyada Dhijitaalka ah ........ 15
Qodobka 36-aad ........ 15
Xirfadaha Shaqaalaha ........ 15
CUTUBKA 6AAD ........ 16
MAAMULKA ........ 16
Qodobka 37-aad ........ 16
Ogaysiinta Guddiga Maamulka Hay'adda ........ 16
CUTUBKA 7AAD ........ 16
XISAABAADKA IYO HANTI-DHOWRKA ........ 16

- Qodobka 38-aad ........ 16
- Ilaalinta Xisaabaadka ........ 16
- Qodobka 39-aad ........ 16
- Hoggaansanaanta Heerarka Xisaabaadka ........ 16
- Qodobka 40-aad ........ 17
- Warbixin Sanadle ah ........ 17
- Qodobka 41-aad ........ 17
- Magacaabida Hanti-dhowre Dibadda ah ........ 17
- Qodobka 42-aad ........ 17
- Shuruudaha Hanti-dhowraha Dibadeed ........ 17
- Qodobka 43-aad ........ 18
- Xilka iyo waajibaadka Hanti-dhowrka ........ 18
- CUTUBKA 8AAD ........ 19
- SOO KABASHADA IYO XARAASHKA ........ 19
- Qodobka 44-aad ........ 19
- Qorshaha Soo Kabashada ........ 19
- Qodobka 45-aad ........ 20
- Tallaaboyinka Soo Kabashada ........ 20
- Qodobka 46-aad ........ 20
- Xaraashka Hay'adaha Maaliyadeed ........ 20
- CUTUBKA 9AAD ........ 21
- CIQAABAHA IYO GANAAXYADA ........ 21
- Qodobka 47-aad ........ 21
- Dembiyada iyo Ciqaabaha ........ 21
- Qodobka 48-aad ........ 21
- Cabashooyinka ........ 21
- Qodobka 49-aad ........ 22
- Ganaaxyada ........ 22
- CUTUBKA 10AAD ........ 22
- QODOBO GUUD ........ 22
- Qodobka 50-aad ........ 22

**Koontooyinka Fadhiidka ah.** ........ 22
**Qodobka 51-aad** ........ 23
**Xeer-nidaamiye** ........ 23
**Qodobka 52-aad** ........ 23
**Burin** ........ 23
**Qodobka 53-aad** ........ 23
**Dhaqan-galka Xeerka** ........ 23

# CUTUBKA 1AAD

# QODOBO GUUD

## Qodobka 1-aad

## Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa lagu magacaabaa Xeerka Hay'adaha Maaliyadda gaarka loo leeyahay ee Puntland.

## Qodobka 2-aad

## Eray Bixin

Haddii aan si kale xeerkan dhexdiisa loogu sheegin, erayadan waxaa loola jeedaa: -

| Lr. | Erayga | Macnaha |
|---|---|---|
| 1. | **Dawlad** | Waxaa loola jeedaa Dawladda Puntland ee Soomaaliyeed. |
| 2. | **Dastuur** | Waxaa loola jeedaa Dastuurka Dawladda Puntland ee Soomaaliyeed. |
| 3. | **Wasiir** | Waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda Dawladda Puntland. |
| 4. | **Guddoomiye** | Waxaa loola jeedaa Guddoomiyaha Bankiga Dawladda Puntland. |
| 5. | **Agaasime** | Waxaa loola jeedaa Agaasimaha Guud ee Bankiga Dawladda Puntland. |
| 6. | **Banki** | Waxaa loola jeedaa Bankiga Dawladda Puntland. |
| 7. | **Hay'ad Maaliyadeed** | Waxaa loola jeedaa Hay'ad si sharci ah looga diiwaangeliyey Puntland oo qabata, bixisa adeegyo maaliyadeed sida, keyd, lacag qabasho, lacag diris, amaah-bixin, maalgelin iyo Caymis. |

| | | |
|---|---|---|
| **8.** | **Xeer** | Waxaa loola jeedaa Xeerka Hay'adaha Maaliyadda gaar loo leeyahay ee ka howl-gala dhulka Puntland |
| **9.** | **Lacagaha La dhaqo** | Waxaa loola jeedaa lahaanshaha, haysashada, beddelashada ama wareejinta nooc kasta oo hanti ah, ayna ka mid tahay lacag. |
| **10.** | **Maalgelinta Argagixisada** | Waxaa loola jeedaa qarinta ama maldihida lacag, taasoo asalkeedii hore uu sharci darro ahaa ama in lagu taageero qof ku hawlan inuu fal-dembiyeed ku geysto, si uu uga baxsado cawaaqibka falalka sharci-darrada ah oo ay geystaan. |
| **11.** | **Raasumaal** | Waxaa loola jeedaa qaddarka ugu yar ee lacag ama hanti ah ee hay'ad maaliyadeed looga baahan yahay inay leedahay si ay u shaqeyso. |
| **12.** | **Khatarta Maaliyadeed** | Waxaa loola jeedaa deymaha, hormarrinnada, lacag la bixidda xad-dhaafka ah, haysashada waraaqaha iyo sidoo kale ballan qaadyada xaashida xisaab-xirka ka baxsan sida aqbalaadaha, dammaanadaha, caymiska, saxiixyada, iibinta saamiyada, warqadda ballan-qaad bixinta, damiin-ka-noqoshada heshiiska, iyo deymaha kale ee mustaqbalka imaan kara. |
| **13.** | **Laan** | Waxaa loola jeedaa xarun kasta oo joogto ah oo aan ahayn xafiiskeeda guud, isla markaasna ay hay'adda maaliyadeed ku qabsato hawlaheeda ganacsiga ee gudaha ama dibedda Puntland. |

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

| | | |
|---|---|---|
| 14. | **Warbixinnada Maaliyadeed** | Waxaa loola jeedaa xaashida xisaab-xirka, xaashida dakhliga, xaashida susunta caddaanka iyo lifaaqyada bayaannada xisaabaadka. |
| 15. | **Banki Shisheeye** | Waxaa loola jeedaa banki lagu yagleelay meel ka baxsan Soomaaliya oo si sharci ah shati loogu siiyey inuu ka fuliyo ganacsi banki gudaha Puntland. |
| 16. | **Xafiiska Sarrifka Lacagaha Qalaad** | Waxaa loola jeedaa shirkad uu Bankiga Dhexe siiyey shati ay ku qaban karto ganacsiga sarrifka lacagaha qalaad. |
| 17. | **Maamule** | Waxaa loola jeedaa maamule sare oo hay'ad maaliyadeed, kaasoo awood u leh inuu xakameeyo, jiheeyo ama saameyn ku yeesho, go'aan ka gaarista arrin la xiriirta ganacsiga hay'adaha maaliyadeed. |

## Qodobka 3-aad

## Ujeeddada Xeerka

Ujeeddooyinka xeerkani waa; -

1. Nidaaminta iyo korjoogtaynta hawlaha ganacsi ee Hay'adaha maaliyadeed ee gaarka loo leeyahay.
2. Bixinta Adeegyo Maaliyadeed oo tayeysan iyo yaraynta khatarta nidaamyada maaliyadeed.
3. Kobcinta iyo Horumarinta Dhaqaalaha.
4. Maalgelinta iyo ilaalinta Hal-abuurka Maaliyadeed.
5. Xoojinta Kalsoonida Macaamiisha, Maalgashadayaasha iyo Ilaalinta Xasilloonida Dhaqaale ee Suuqyada Maaliyadeed.
6. Maareynta sharci iyo maamul ee hay'adaha maaliyadeed oo ku jira xaalad dhaqaale oo halis ah ama burbur.

## Qodobka 4-aad

## Baaxadda Xeerka

Xeerkan waxaa lagu dhaqayaa dhammaan qeybaha Hay'adaha Maaliyadeed ee gaarka loo leeyahay ee ka hawlgala gudaha Puntland.

# CUTUBKA 2-AAD

# AWOODAHA BANKIGA DAWLADDA PUNTLAND

## Qodobka 5-aad

## Qiimeynta Heerka Raasumaalka

Bankigu wuxuu cabbiraa heerka ilaalinta raasumaalka Hay'adaha Maaliyadeed ee gaarka loo leeyahay, si loo hubiyo in ay dabooli karaan khataraha ay wajihi karaan.

## Qodobka 6-aad

## Dib-u-eegista Xisaabaadka iyo Warbixinnada Maaliyadeed

Bankiga Dawladda Puntland; -

1. Wuxuu ka dalban karaa in hay'adaha maaliyadu soo gudbiyaan xisaabaadkooda iyo warbixinnadooda maaliyadeed.
2. Wuxuu baaritaan ku samaynayaa saxnaanta xisaabaadka iyo warbixinnada maaliyadeed ee Hay'adaha maaliyadeed soo gudbiyaan.
3. Wuxuu hubiyaa in hay'aduhu haystaan lacag caddaan ah oo ku filan si ay uga jawaabaan baahiyaha macaamiisha iyo waajibaadyada kale.
4. Wuxuu xaqiijiyaa in warbixinnadaasi ay waafaqsan yihiin heerarka xisaabaadka caalamiga ah iyo shuruucda Puntland.

## Qodobka 7-aad

## Kormeerka Nidaamka Gudaha iyo Maareynta Khataraha

Bankiga Dawladda Puntland; -

1. Wuxuu hubiyaa in Hay'aduhu leeyihiin nidaamyo gudaha ah oo ka hortagi kara musuq-maasuqa iyo khaladaadka.

2. Wuxuu baaraa nidaamka maareynta khataraha ee Hay'adaha sida:- maareynta deynta, khatarta suuqa iyo khatarta hawlgalka.
3. Wuxuu qiimeeyaa nidaamyada maamulka iyo hababka shaqada.
4. Qiimaynta tayada iyo aqoonta maamulka Hay'adaha maaliyadeed.

## Qodobka 8-aad

## Hawl-gallada Joogtada ah

1. Wakiillo ka socda Bankiga ayaa booqasho ku tagaya xafiisyada hay'adaha maaliyadeed, si ay toos ugu eegaan hawlgallada iyo nidaamyadooda shaqo.
2. Waxaa la baarayaa heshiisyada deynta, maalgashiga, kaydka lacagaha iyo habka maamulka.

## Qodobka 9-aad

## Xakameynta iyo Oggolaanshaha

Bankiga Dawladda Puntland; -

1. Wuxuu xakameeyaa furitaanka bankiyo cusub, ballaarinta ama isbeddelada kale ee muhiimka ah.
2. Wuxuu siinayaa ruqsado iyo oggolaansho si sifo sharci ah ugu hawl-galaan Hay'adaha kala duwan ee maaliyadeed.
3. Wuxuu ansixiyaa furitaanka laamaha, adeegsiga tiknoolajiyada iyo adeegyada cusub ee maaliyadeed.

## Qodobka 10-aad

## Kordhinta ama Dhimista Saami Muhiim ah

Bankiga Dawladda Puntland wuxuu fari karaa saamile kasta oo muhiim ah ama qof kasta oo saami mugle ku leh hay'ad maaliyadeed inuu kordhiyo ama dhimo saamigiisa haddii arrintaasi lagama-maarmaan u tahay hay'adda maaliyadeed.

## Qodobka 11-aad

## Tallaabooyin Maamul

1. Haddii hay'ad maaliyadeed lagu helo khaladaad ama xadgudubyo, Bankigu wuxuu qaadayaa tallaabooyinka maamul ee ku habboon sida ganaax, digniin ama labadaba.

2. Tallaabo kasta oo keenaysa hubinta in hay'adaha maaliyadeed ay si nidaamsan oo sharci iyo hufnaan leh u shaqeeyaan, si nidaamka maaliyadeed u noqdo mid xoogan oo la isku halayn karo.

## CUTUBKA 3-AAD
## DIIWAANGELINTA IYO RUQSADSIINTA

### Qodobka 12-aad
### Noocyada Shatiyada

1. Noocyada Shatiyada waxaa loo kala saarayaa sida soo socota: -
   B. Shatiga Ganacsiga Bankiyada.
   T. Shatiga Ganacsiga Xawaaladaha.
   J. Shatiga Ganacsiga Shirkadaha Maalgelinnada yar-yar.
   X. Shatiga Ganacsiga Shirkadaha Caymiska.
   Kh. Shatiga Ganacsiga Adeegga Lacagaha Danabaysan.
   D. Shatiga Ganacsiga Sarrifka Lacagaha Qalaad.
   R. Shatiga Ganacsiga Iskaashatooyinka Keydinta Iyo Deymaha.
   S. Shatiga Ganacsiga Xarumaha Maaliyadeed ee Bulsho.
   Sh. Shatiga Ganacsiga Haftada.
   Dh. Shati Kasta oo La Xiriira Ganacsi Maaliyadeed.
2. Bankiga Dawladda Puntland ayaa ka mas'uul ah arrimaha shati siinta, nidaaminta iyo kormeerka Hay'adaha Maaliyadeed ee ka hawl-gala Puntland.
3. Cidina ma samayn karto dhaq-dhaqaaq ganacsi maaliyadeed, iyadoon oggolaansho ka haysan Bankiga dhexe ee Dawladda Puntland.

## Qodobka 13-aad

## Shuruudaha Shati Bixinta

Cidkasta oo samaysa Hay'ad Ganacsi Maaliyadeed, waxaa looga baahan yahay inay u soo gudbiso Bankiga Dawladda Dukumintiyadan soo socda; -

1. Codsi qoraal ah.
2. Nuqulka diiwaangelinta ee Wasaaradda Ganacsiga.
3. Xeerka lagu asaasay iyo Xeer-Hoosaadka shaqo ee Shirkadda.
4. Siyaasadaha iyo habraacyadooda khuseeya xakamaynta gudaha, maareynta khatarta, xisaabaadka iyo amaahda.
5. Qaab-dhismeedka hay'adda maaliyadeed.
6. Caddayn qoraal ah oo muujinaysa raasumaalka asalka ah.
7. Qorshe ganacsiyeedka muujinaya nooca ganacsiga.
8. Liiska xarumaha iyo laamaha gudaha Puntland.
9. Taariikh nololeedka (CV), aqoonsiyada, shahaadooyinka iyo caddaynta dembi la'aanta ee agaasimayaasha fulinta iyo saraakiisha sare
10. Khidmadda diiwaangelinta iyo qiimaynta.
11. Bankiga Dawladda Puntland wuxuu soo saarayaa Xeer-nidaamiye lagu faah-faahinayo khidmadaha, foomamka codsiga iyo macluumaad kasta oo looga baahan yahay Hay'adaha Maaliyadeed.
12. Khidmadaha waxaa lagu qeexayaa Xeer-nidaamiye uu soo saaro Bankiga Dawladda Puntland, Xeer-nidaamiyahaasna waxaa laga diiwaangelinayaa Golaha Wakiillada, khidmadahana waxaa lagu darayaa miisaaniyadda Dawladda sannad maaliyadeed kasta.

## Qodobka 14-aad

## Soo Saarista Shatiga

1. Bankiga Dawladda Puntland wuxuu muddo 30 beri gudahood ah oo ka bilaabmaysa marka dhammaan macluumaadka loo baahan yahay soo gaaro, soo saarayaa go'aanka oggolaanshaha ama diidmada Shatiga ganacsi maaliyadeed.
2. Haddii Bankiga Dawladdu diido bixinta Shatiga waa inuu faah-faahiyo sababaha diidmada.

3. Shatiga cusub ee Bankiga Dawladdu bixiyo waa inuu ku baahiyo Warbaahinta Dawladda iyo mareegta Bankiga.
4. Shatiga waxaa la cusboonaysiinayaa sanadkiiba hal (1) mar.
5. Si loo cusboonaysiiyo Shatiga waa in Hay'adda Maaliyadeed u soo gudbiso Bankiga Dawladda codsi qoraal ah labo (2) bilood ka hor muddada dhicitaanka Shatigii hore.

## Qodobka 15-aad
## Diiwaanka Hay'adaha Maaliyadda

Bankiga Dawladdu wuxuu diyaarinayaa, haynayaana diiwaanka dhammaan noocyada hay'adaha maaliyadeed ee Shatiga haysta, waxaana lagu daabacayaa mareegaha Bankiga Dawladda.

## Qodobka 16-aad
## Banki Ajnabi

Banki ajnabi ah oo doonaya inuu ganacsiga bankiyada ka furto geyiga Dawladda Puntland, waxaa looga baahan yahay shuruudahan soo socda: -

1. Wuxuu shati banki ka dalbanayaa Bankiga Dawladda Puntland, isagoo soo buuxinaya qaabka loogu talo galay arjiga codsiga shatiyada.
2. Arjiga waxaa la soo raacinayaa dhammaan xogta la xiriirta dhaqdhaqaaqa hawlaha maaliyadeed ee Bankigaasi ka fuliyey dalkiisa, sida xadka, tayada iyo nooca kormeerka uu Bankigaas fuliyey ay gaarsiisan yihiin.
3. Bankiga Dawladda Puntland markuu qiimeeyo arrimahaas kor ku xusan, ayuu go'aan kama dambays ah ka gaarayaa inuu Bankigaas Ajnabi siiyo Shati iyo in uu diido.

## Qodobka 17-aad
## Kala Noqoshada Shatiga

1. Marka Hay'ad Maaliyadeed ee gaar loo leeyahay lagala noqdo Shatiga, ma sii wadi karto hawlihii maaliyadadeed ee ay qaban jirtay.
2. Sababaha keeni kara in Shatiga dib loogala noqdo Hay'ad Maaliyadeed waxaa ka mid ah: -

   b. Haddii la caddeeyo in shatiga lagu bixiyey xog been-abuur ah ama

khiyaamo.

t. Haddii cida la siiyey Shatiga ku guuldaraysato inay bilowdo hawlaheeda ganacsi muddo sannad gudihiis ah.

J. Haddii shirkadu ku xadgudubto xeerkan, habraacyadiisa iyo xeerarka kale ee Maaliyadeed.

x. Ku guuldareysiga buuxinta shuruudaha shatiga sida xeerarka maaliyadeed, caymiska iyo lacagta ugu yar ee uu ku shaqeyn karo.

kh. Xaalado dhaqaale oo adag sida lacag la'aan ba'an ama hantida oo aad u hooseysa.

d. Haddii Khatar ku timaado nidaamka maaliyadeed ee Hay'adda.

## CUTUBKA 4AAD

## FEEJIGNAANTA IYO XAKAMAYNTA MAALIYADEED

### Qodobka 18-aad

### Raasumaalka

1. Hay'adaha maaliyadda waxaa looga baahan yahay inay haystaan raasumaal lacag ama hanti ah, si ay u socodsiiyaan hawlahooda ganacsi, loona ilaaliyo kalsoonida macaamiisha.
2. Hay'adaha maaliyadeed waxaa Bankiga Dawladda Puntland laga dhigayaa, lacag caddaan ah oo u dhiganta midda ay ku shaqaynayaan.
3. Qaddarka raasumaalka looga baahan yahay shirkadaha maaliyadeed ee kala duwan, waxaa xeer-nidaamiye ku soo saarayaa Bankiga Dawladda Puntland.
4. Noocyada raasumaalka muhiimka ah ee looga baahan yahay Hay'adaha maaliyadeed waxaa ka mid ah; -

   b. Raasumaalka asalka ah ee lacagta ay maalgeliyayaasha ama saamileyda hay'addu gelinayaan markii la aasaasayo ama la ballaarinayo hay'adda.

   t. Raasumaalka Ilaalinta oo ah qaddarka raasumaal ee hay'addu u baahan tahay, si ay u daboosho khataraha ay la kulanto, waxaana lagu cabbiraa heerka raasumaalka ilaalinta oo uu dejiyo Bankiga Dawladda Puntland.

   j. Raasumaalka kaydka ah waa qayb ka mid ah faa'iidada hay'adda ee loo qoondeeyey sidii kayd ama ilaalin dhaqaale, hay'adaha maaliyadduna

waa inay dhammaadka sannad maaliyadeed kasta ku wareejisaa akoonkeeda kaydka waajibka ah ugu yaraan boqolkiiba shan iyo labaatan (25%) faa'iidada saafiga ah.

5. Shirkadaha bixiya adeegyada lacagaha danabaysan waa inay ku haystaan khasnadooda lacag caddaan ah oo u dhiganta midda danabaysan, mana samayn karaan lacag cusub oo danabaysan, iyadoo aan la ogaysiin Bankiga Dawladda Puntland.

## Qodobka 19-aad
## Xaddidaadda Amaahda iyo Maalgashiga

1. Hay'adaha maaliyadeed waa inay leeyihiin habraacyo iyo siyaasado xaddidaya qaddarka amaahda hal macmiil ama koox, si looga hortago khataraha maaliyadeed.
2. Hay'adaha maaliyadeed waa inay u hoggaansamaan habraacyada iyo nidaamyada lagu xaddidayo noocyada deymaha iyo qaddarka maalgashiyada ay samayn karaan ee Bankiga Dawladda Puntland soo saaro, si looga hortago khataraha maalgashi ee aan habboonayn.
3. In la hubiyo qofka qaadanaya maalgelinta inuu bixin karo maalgelinta uu qaadanayo, iyadoo la caddaynayo inaan banki kale looga lahayn lacag maalgelin ah.

## Qodobka 20-aad
## Xaddidaadaha Bixinta Faa'iidada Saamiyada

1. Bankiga Dawladda Puntland wuxuu xeer-nidaamiye ku xaddidayaa bixinta faa'iidada, iyadoo loo eegayo halbeegga raasumaalka waajibka ah ee hay'adda maaliyadeed.
2. Ma jirto Hay'ad Maaliyadeed oo ku dhawaaqi karta, biirin karta, bixin karta ama dibadda u wareejin karta wax faa'iido ah ama samayn karta wareejin kasta oo la xiriirta faa'iidadii la sameeyey ilaa; -
   b. La gudo dhammaan kharashaadkii dib loo dhigay oo ay ku jiraan kharashaadka hordhaca ah iyo kuwa la xiriira aasaaska shirkadda, faa'iidada iibinta saamiyada, dullaalnimada, khasaaraha dhacay iyo shay

kasta oo kale oo kharash ah oo aan loo hayn hanti la taaban karo.

t. La tixgeliyo kharashaadka iyo lacagta dheeriga ah ee lagu biirinayo raasumaalkeeda.

j. Loo diyaariyo qoondo ku filan deymaha xumaaday, kuwa shakiga leh ama hantida kale, taasoo uu ku qanacsan yahay Bankiga Dawladda Puntland, marka laga hadlayo hay'ad maaliyadeed oo bixisa deymo ama tashiilaad amaah ah.

3. La tixgeliyo soo saarista saamiyada dhiirrigelinta ah oo ka imaanaya macaashka bixinta faa'iidada saamiyada.

## Qodobka 21-aad

## Xadka Lahaanshaha Saamiyada

1. Qof ama koox dad ah oo xiriir uu ka dhaxeeyo si toos ah ama si dadban uma yeelan karaan lahaanshaha ama gacan-ku-haynta saamiyada codbixinta Banki kasta in ka badan 49% saamiyada codbixinta.
2. Bankiga Dawladda Puntland wuxuu awoodaa inuu oggolaado qof ama koox uu xiriir ka dhaxeeyo inay yeeshaan lahaansho ama gacan-ku-haynta saami ka badan xadka caadiga.
3. Qodobkan laguma dhaqayo Banki ay Dawladda Puntland leedahay.

## Qodobka 22-aad

## Shuruudaha Lahaanshaha Saamiyada

Waxaa reebban iyadoo aan oggolaansho laga haysan Bankiga Dawladda Puntland: -

1. In qof amase koox dad ah oo xiriir uu ka dhaxeeyo ay gacanta ku dhigaan dhammaan hantida uu Banki leeyahay.
2. Waxaa reebban in Banki uu diiwaangeliyo, wareejin saamiyo ka badan boqolkiiba shan (5%) saamiyada codbixinta ee Banki uu leeyahay, iyadoo aan laga haysan oggolaansho qoraal ah Bankiga Dawladda Puntland.



GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND STATE GENERAL SOLICITOR

## Qodobka 23-aad

## Codsiga Habraaca Wareejinta Saamiyada

Araajida lagu codsanayo wareejinta saamiyada waxaa lagu soo hagaajinayaa, Bankiga Dawladda Puntland, waana in la soo raaciyaa xogta soo socota: -

1. Magacyada, cinwaannada arjiilaha iyo kuwa qofka arjiiluhu doonayo in saamiyadaas loo wareejiyo.
2. Soo jeedinta Heshiiska iibka saamiyada.
3. Caddeyn muujineysa in arjiiluha iyo cidda uu doonayo inuu ka iibiyo saamiyadaas iney yihiin dad dhimir ahaan fiyow oo heshiis gali kara.
4. Xog-kastoo kale oo Bankiga Dawladda Puntland uu weydiisan karo.
5. Bankiga Dawladda Puntland marka uu helo arjigaas iyo xogta la xiriirta ee kor lagu soo sheegay, wuxuu muddo dhan 30 beri ka baaraandegayaa xogtaas, wuxuuna qoraal ku ogeysiinayaa arjiilaha in codsigiisii la oggolaaday ama la diiday.
6. Qofka saamiga la wareegaya waa in uusan ku lug lahayn falal la xiriira lacag-dhaqid, isla markaana uusan ka mid ahayn kooxaha argagixisada, codsigiisana waa inuu soo mariyaa Nootaayo sharciyeysan.

## Qodobka 24-aad

## Mamnuucidda Diiwaangelinta Saamiyo Cid Kale

Waxaa ka reebban diiwaangelinta saamiyo ku qoran magacyo cid kale, Bankiyadu waa ineysan: -

1. Oggolaan ama soo saarin haba-yaraatee saamiyo ama diiwaangelin saamiyadooda magac ka duwan magaca qofka saamiyada iska leh.
2. Wareejin haba yaraatee saamiyo magaca lagu qoray uu ka duwan yahay magaca qofkii iska lahaa saamiyadaas.

## Qodobka 25-aad

## Saamiyada Magac Kale Ku Qoran

Waxaa la oggol yahay soo saaridda, qoondada ama diiwaangelinta wareejinta saamiyo Banki oo ku qoran magaca Maamule gaar ah, cidda lagu amaaneystay

hanti sida Bankiga Dawladda Puntland, qof matalaya qof tasarrufkii beelay, ama qof xaraashle ah.

## Qodobka 26-aad

## Lacagaha Sharci-darrada ah

1. Hay'adaha maaliyadeed waa inay fuliyaan tallaabooyin lagu ogaanayo loogana hortagayo lacagaha la dhaqo, maalgelinta argagixisada iyo ka ganacsiga maandooriyaha.
2. Bankiga Dawladda Puntland wuxuu soo saarayaa Xeer-nimaaye faah-faahinaya tallaabooyinka la qaadayo, si looga hortago lacag dhaqista iyo maalgelinta argagixisada.

## Qodobka 27-aad

## Xaddidaadda

Hay'adaha maaliyadeed waa inay u hoggaansamaan habraacyada iyo nidaamyada lagu haggayo, si loo furo laamo cusub ama loo ballaariyo adeegyadooda.

# CUTUBKA 5AAD

# WAAJIBAADKA HAY'ADAHA MAALIYADDA

## Qodobka 28-aad

## Bixinta Adeegyo Maaliyadeed oo Hufan

1. Hay'adaha maaliyadeed waa inay siiyaan macaamiisha adeegyo kala duwan oo maaliyadeed sida kaydinta lacagaha, amaahda, caymiska, maalgashiga, iyo adeegyada danabaysan.
2. Fududeynta helitaanka adeegyada maaliyadeed, gaar ahaan dadka aan hore u helin adeegyo maaliyadeed.

## Qodobka 29-aad

## Ilaalinta Xogta iyo Lacagaha Macaamiisha

Hay'adaha Maaliyadeed waa inay; -

1. Hubiyaan amniga lacagaha iyo hantida kale ee macaamiisha.
2. Ilaaliyaan dhaqaalaha iyo hantida macmiilka, iyagoo hubinaya inaan si khaldan loo isticmaalin ama loo gelin khatar aan loo baahnayn.
3. Ilaaliyaan xogta macaamiisha, mana faafin karaan xogtaas ilaa amar maxkamadeed laga helo.
4. Qaataan tallaabooyin looga hortagayo khiyaamada iyo musuq-maasuqa.

## Qodobka 30-aad

## Kormeerka iyo Maareynta Khatarta

Hay'adaha Maaliyadeed waa; -

1. Inay qiimeeyaan oo xakameeyaan khataraha la xiriira maaliyadda, sida deynta aan la bixin karin, isbeddelka suuqa iyo khataraha kale ee dhaqaalaha.
2. Inay yeeshaan nidaamyo adag oo kormeerka gudaha iyo dibadda ah.

## Qodobka 31-aad

## U Hoggaansanaanta Xeerarka

Hay'adaha maaliyadeed waa; -

1. Inay u hoggaansamaan dhammaan xeerarka, siyaasadaha Bankiga dawladda iyo hay'adaha maaliyadeed.
2. Inay si joogto ah u la socdaan isbeddelada xeerarka, siyaasadaha iyo nidaamyada maaliyadeed.
3. Inay leeyihiin Qareenno ama shirkado sharci oo metala.

## Qodobka 32-aad

## Daah-furnaan iyo La Xisaabtan

Hay'adaha maaliyadeed waa; -

1. Inay si cad u soo bandhigaan xaaladda maaliyadeed ee shirkadda iyo qaababka loo maareeyo hantida, si loo hubiyo hufnaanta hawl-galkooda.

2. Inay bixiyaan warbixinno maaliyadeed oo sax ah iyo kuwa kale ee muhiimka ah lana wadaagaan saamilayda, Bankiga Dawladda iyo Dadweynaha.

## Qodobk 33-aad

## Horumarinta Macaamiisha iyo Bulshada

Hay'adaha maaliyadeed waa; -

1. Inay taageeraan koboca dhaqaale ee macaamiishooda, iyagoo siinaya talooyin iyo adeegyo ku habboon.
2. Inay ka qayb qaataan horumarinta bulshada, iyagoo dhiirigelinaya maalgelinta mashaariicda horumarineed iyo adeegyada bulshada.

## Qodobka 34-aad

## Horumarinta Tiknoolajiyadda

Hay'adaha maaliyadeed waa; -

1. Inay isticmaalaan tiknoolajiyadda casriga ah, si loo wanaajiyo adeegyada maaliyadeed, loona yareeyo khataraha amniga.
2. Inay soo kordhiyaan adeegyo cusub oo ku saleysan tiknoolajiyadda, si ay ula jaanqaadaan isbeddelada suuqayada caalamiga ah iyo kuwa maaliyadeed.

## Qodobka 35-aad

## Gelitaanka Nidaamyada Dhijitaalka ah

Hay'adda maaliyadeed waa inay siisaa Bankiga Dawladda Puntland marin ammaan ah oo lagala socon karo si toos ah, isla markaana akhris-keliya ah si uu ula socdo wax kala iibsiga wakhtiga dhabta ah iyo diiwaannada lagu hayo nidaamka maaliyadeed.

## Qodobka 36-aad

## Xirfadaha Shaqaalaha

Hay'adaha maaliyadeed waa; -

1. Inay hubiyaan in shaqaalahooda ay leeyihiin xirfado iyo aqoon ku filan si ay u bixiyaan adeegyo tayo leh.
2. Inay bixiyaan tababarro kor loogu qaadayo xirfadaha iyo aqoonta shaqaalaha.

## CUTUBKA 6AAD

## MAAMULKA

### Qodobka 37-aad

### Ogaysiinta Guddiga Maamulka Hay'adda

Xubnaha Guddiga Maamulka oo ay soo magacaabaan saamileyda Hay'adaha ganacsi oo looga baahan yahay iney yihiin dad u qalma gudashada waajibaadka loo magacaabay, isla markaasna yihiin dad aqoon iyo waaya-aragnimo leh, waxaana magacaabistooda la ogeysiinayaa Bankiga Dawladda Puntland.

## CUTUBKA 7AAD

## XISAABAADKA IYO HANTI-DHOWRKA

### Qodobka 38-aad

### Ilaalinta Xisaabaadka

1. Hay'adaha Maaliyadeed waxaa ku waajib ah inay si dhammaystiran oo sax ah u kaydiyaan diiwaannada maaliyadeed oo faaf-faahsan iyo dukumintiyada kale ee xisaabaadka oo ay ku jiraan dhammaan wax kala iibsiga, hantida, deymaha, dakhliga iyo kharashyada.
2. Diiwaannada maaliyadeed, Buuggaag xisaabeedyada iyo xogaha dhaqdhaqaaqyada ee ay Hay'adi samayso waa inay hayso ugu yaraan (5) sanno oo ka bilaabanta taariikhda dhaqdhaqaaqyada ugu horreeya ay samaysay.
3. Muddo 3 bilood gudohood ah dhammaadka sanad maaliyadeed kasta, Hay'aduhu waxay Bankiga Dawladda Puntland la wadaagayaan diiwaannadooda maaliyadeed oo dhammaystiran.
4. Dhammaan buuggaagta xisaabta iyo dukumintiyada kale ee maaliyadeed waxaa baaraya Hanti-dhowre lixdii (6) biloodba mar.

### Qodobka 39-aad

### Hoggaansanaanta Heerarka Xisaabaadka

Diiwaannada maaliyadeed waa in loo diyaariyaa si waafaqsan mabaadi'da iyo heerarka xisaabinta caalamiga ah, si loo hubiyo joogtaynta iyo isku halaynta.

## Qodobka 40-aad

## Warbixin Sanadle ah

Hay'adaha maaliyadeed waa inay si sanadle ah u diyaariyaan oo ay u gudbiyaan xisaab xirkooda Bankiga Dawladda, saamilayda iyo daneeyayaasha kale.

## Qodobka 41-aad

## Magacaabida Hanti-dhowre Dibadda ah

1. Hay'adaha maaliyaddu waxay magacaabayaan hanti-dhawre madax-bannaan oo dibadda ah, si uu u baaro una xaqiijiyo xisaab-xirkooda sannad kasta, waxaana loo gudbinayaa Bankiga Dawladda.
2. Bankiga Dawladdu wuxuu awood u leeyahay inay ansixiyaan ama diidaan magacaabista hantidhawrka, isagoo qiimaynaya shuruudaha looga baahan yahay.
3. Bankiga Dawladda Puntland wuxuu Hantidhowre baara xisaabaadka u magacaabayaa Hay'adda maaliyadeed, sabab kasta ha ku timaadee haddii ay ka gaabiso inay magacawdo Hantidhowre.

## Qodobka 42-aad

## Shuruudaha Hanti-dhowraha Dibadeed

1. Hanti-dhowruhu waa inuu noqdaa qof u qalma, xirfad u leh shaqada, shahaado jaamacadeed haysta ama shirkad ka tirsan kana diiwaan-gashan hay'ad xisaabeed oo la aqoonsan yahay ama Bankiga Dawladda Puntland.
2. Hanti-dhawraha dibadda waa inuu ka madax-bannaan yahay hay'adda oo aanay jirin iska-horimaadyo dano, si uu u bixiyo ra'yi hanti-dhawr oo aan dhinacna u xaglin.
3. Hanti-dhowre dibadeed looma magacaabi karo qof ka mid ah saamilayda, maamulka ama shaqaalaha ka tirsan Hay'adaas.

## Qodobka 43-aad

## Xilka iyo waajibaadka Hanti-dhowrka

Si loo hubiyo hufnaanta, daah-furnaanta iyo kalsoonida howlaha maaliyadeed, loogana hortago musuqmaasuqa, khaladaadka iyo maareyn la'aanta khayraadka ee Hay'adaha maaliyadeed. Hantidhowrku wuxuu leeyahay xilka iyo waajibaadkan; -

1. Hubinta Xisaabaadka iyo Diiwaangelinta Maaliyadeed; -
   b. Inuu xaqiijiyo in dhammaan xisaabaadka hay'addu ay yihiin kuwo sax ah, dhammeystiran, oo waafaqsan shuruucda iyo heerarka xisaabaadka.
   t. Inuu baaro diiwaannada maaliyadeed si looga hortago khaladaad ama wax isdabamarin.
2. Kormeerka maaraynta Khatarta iyo Nidaamyada Gudaha; -
   b. Inuu hubiyo nidaamyada maaraynta khataraha ee Hay'aduhu yihiin kuwo shaqeynaya, si loo yareeyo halista dhaqaale ama sharci.
   t. Inuu qiimeeyo nidaamyada gudaha ee xakamaynta, si loo ogaado inay ku filan yihiin ka hortagga khaladaadka iyo musuqmaasuqa.
3. Baarista Isticmaalka Khayraadka iyo Hantida; -
   b. Inuu xaqiijiyo in hantida hay'adda si habboon waafaqsanna ujeeddada loo qoondeeyey, maamulo loona isticmaalo.
   t. Inuu hubiyo saxnaanta dakhliga, kharashaadka iyo maareynta hantida.
4. Dib-u-eegista waxqabadka Maaliyadeed; -
   b. Inuu qiimeeyo waxqabadka maaliyadeed ee hay'adda si loo ogaado in la gaaray yoolalka iyo qorshayaasha maaliyadeed ee la dajiyey.
   t. Hanti-dhowrku wuxuu dib u eegaa siyaasadaha maaliyadeed iyo qorshayaasha sanadka.
   j. Wuxuu hubiyaa warbixinnada maaliyadeed sida dakhliga ka soo xerooda adeegyada amaahda, lacagaha kaydka iyo faa'iidada guud.
   x. Wuxuu cabbiraa waxqabadka Hay'adda sida heerka kobaca dakhliga, qiimaha khasaaraha amaahda iyo saamiga raasumaalka.

5. Ka Hortagga musuqmaasuqa iyo Xadgudubka; -
   b. Inuu baaro soona bandhigo wax kasta oo muujinaya musuqmaasuq, xatooyo, ama xadgudubyo kale oo ka dhaca hay'adaha maaliyadeed.
   t. Inuu dhiirigeliyo dhaqanka daah-furnaanta iyo isla xisaabtanka gudaha hay'adaha.
6. Hubinta u hoggaansanaanta Shuruucda iyo Xeerarka; -
   b. In la xaqiijiyo in hay'aduhu u hoggaansamaan dhammaan shuruucda, xeerarka iyo siyaasadaha maaliyadeed ee khuseeya.
7. Soo Saarista Warbixinta: -
   b. Hanti-dhowrku wuxuu diyaarinayaa warbixin hantidhowr oo faah-faahsan, taasoo ku jirta natiijooyinka waxqabadka, xaaladda dhaqaale iyo maamulka hay'adaha.
   t. Warbixinta waa inay ku jiraan talooyin ku saabsan hagaajinta nidaamyada maaliyadeed iyo maamulka si waxqabadka loo kordhiyo.
   J. Warbixinta iyo xisaab xirada waxaa loo gudbiyaa Bankiga Dawladda, maamulka Hay'adda, saamilayda iyo daneeyayaasha kale.

## CUTUBKA 8AAD

## SOO KABASHADA IYO XARAASHKA

### Qodobka 44-aad

### Qorshaha Soo Kabashada

1. Haddii ay dhacaan dhibaatooyin dhaqaale, Bankiga Dawladdu wuxuu farayaa hay'adda maaliyadeed inay u soo gudbiso qorshaha soo kabasho si loo ansixiyo.
2. Si loo xakameeyo saameynta taban ee ka dhalan karta burburka hay'adda, iyadoo la ilaalinayo kalsoonida nidaamka maaliyadeed waxaa la qaadayaa tallaabooyin sharci iyo maamul.
3. Si looga hortago burburka hantida hay'adda, waa in la xoojiyo hagaajinta maamulka, yaraynta khasaaraha iyo hubinta inay sii wadi karto adeegyada macaamiisha.

## Qodobka 45-aad

## Tallaabooyinka Soo Kabashada

Tallaabooyinka soo kabashada waxaa ka mid ah; -

1. Dib-u-habeyn maaliyadeed, kordhinta raasumaalka iyo yareynta deymaha liita.
2. Maareyn cusub, beddelka maamulka ama ku soo celinta kartida maamulka.
3. Taageero dawladeed, kaalmada lacageed iyo dammaanad qaadka Dawladeed.
4. Qorsheynta istaraatiijiyadeed, kala wareejinta hantida ama qayb ka mid ah hay'adda ama hay'ad kale oo shaqeynaysa.
5. Abuurista hay'ad ku meel gaar ah oo maamusha hantida hay'adda.
6. Soo kabashada waxaa lagu samaynayaa, iyadoo la raacayo xeerarka maaliyadda, habraacyada iyo hagayaasha Bankiga Dawladda Puntland soo saaro.

## Qodobka 46-aad

## Xaraashka Hay'adaha Maaliyadeed

1. Xaraashku waa habka ugu dambeeya ee lagu baabi'inayo hay'ad maaliyadeed oo aan laga soo kaban karin, iyadoo hantideeda la iibinayo si loo bixiyo deymaha lagu leedahay.
2. Xaraashku wuxuu dhacaa marka hay'addu ay ku jirto xaalad dhaqaale oo aad khatar u ah ama marka Bankigu garowsado inaysan jirin wax soo kabasho ah.
3. Nidaamka xaraashka waxaa maamulaya qof ama koox Bankigu u magacaabay oo mas'uul ka ah iibinta hantida hay'adda iyo bixinta deymaha.
4. Marka hantida la iibiyo, lacagta waxaa loo adeegsanayaa in lagu bixiyo deymaha macaamiisha, deyn bixiyeyaasha iyo sidoo kale kharashaadka kale ee xaraashka.
5. Kadib xaraashka, hay'adda waa la tirtirayaa oo ma jireyso sharci ahaan.
6. Bankiga Dawladda Puntland ayaa soo saaraya habraaca lagu hagayo nidaamka xaraashka.

# CUTUBKA 9AAD

# CIQAABAHA IYO GANAAXYADA

## Qodobka 47-aad

## Dembiyada iyo Ciqaabaha

1. Bankiga Dawladda Puntland wuxuu kala shaqaynayaa hay'adaha kale ee awooda u leh inay ku soo oogaan ciqaab hay'adaha maaliyadeed ee fal-dembiyeed maaliyadeed gala.
2. Fal-dembiyeedyada lagu soo oogi karo hay'adaha maaliyadeed haday dhacaan waxaa ka mid ah; -
   b. Lacag-dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada.
   t. Khiyaamada iyo ka been sheegida warbixinnada maaliyadeed.
   j. Laaluush iyo musuqmaasuq.
   x. Ganacsi ruqsad la'aan.
   kh. Jabinta iyo ku xadgudubka Xeerarka maaliyadeed ee Puntland.
   d. Fal-dembiyeed kasta oo la xiriira nidaamyada iyo xeerarka maaliyadeed ee Puntland.
3. Fal-dembiyeedyadan waxaa ka dhalanaya ciqaab ganaax, xabsi ama labadaba.
4. Iyadoo aan wax loo dhimayan xeerarka kale ee dhaqangalka ah, ciqaabuhu waa ganaax lacageed oo u dhexeeya ($5,000 ilaa $ 20,000) iyo ciqaab xabsi oo aan ka yarayn hal (1) sano, kana badnayn shan (5) sano.

## Qodobka 48-aad

## Cabashooyinka

Qofkasta oo aan ku qancin go'aannada iyo ganaaxyada maamul ee Bankiga Dawladda Puntland waxay cabasho u qaadan karaan Maxkamadda Sare ee Dawladda Puntland.

## Qodobka 49-aad

## Ganaaxyada

1. Bankiga Dawladda Puntland wuxuu ku soo rogayaa hay'adaha maaliyadeed Ganaaxyo maamul, marka ay ku xad-gudbaan xeerarka iyo habraacyada maaliyadeed ama ku guuldareystaan inay u hoggaansamaan shuruudaha feejignaanta.
2. Ganaaxyada maamulka ee Bangiga Dawladda Puntland ku soo rogi karo Hay'adaha Maaliyadeed waxaa ka mid ah; -
   b. Ganaaxyada u hogaansan la'aanta ka-hortagga lacagta dhaqitaanka iyo maalgelinta argagixisada.
   t. Ganaaxyada jebinta Shuruudaha ku filnaanta Raasumaalku, marka Hay'adaha maaliyadeed ay ilaalin waayaan raasumaalka ugu yar ee loo baahan yahay.
   j. Ganaaxyada xadgudubyada amaahda iyo maalgashiga.
   x. Ganaaxyada ku xadgudubka ilaalinta xogta macmiilka.
   kh. Ganaaxyada guul-darrooyinka hawleed ama khatarta nidaamka.
   d. Ganaaxyada u hoggaansan la'aanta soo gudbinta warbixinnada.
   r. Ganaaxyada hakinta shatiga xadgudubyo soo noqnoqday awgeed.
3. Bankiga Dawladda Puntland wuxuu qaadi karaa talaabo kasta oo lagu hagaajinayo, laguna ilaalinayo nidaamyada maaliyadeed.
4. Bankiga Dawladda Puntland wuxuu soo saarayaa Xeer-nidaamiye lagu faah-faahinayo ganaaxyada maamul iyo qaddarka laga qaadayo Hay'adaha maaliyadeed ee kala duwan.

## CUTUBKA 10AAD

## QODOBO GUUD

## Qodobka 50-aad

## Koontooyinka Fadhiidka ah.

1. Koontooyinku waxay fadhiid noqdaan haddii aan wax hawl ah lagu qaban muddo lix (6) bilood oo xiriir ah.
2. Wax kharash ah lagama qaadi doono koonto fadhiid ah.

3. Hay'adda maaliyadeed waa inay xirtaa koontooyinka macaamiisha ee fadhiidka noqda oo aan wax dhaqdhaqaaq ah lagu samaynin muddo laba (2) sano oo xiriir ah.
4. Lacag kasta oo ku jirta koonto fadhiid ah waa in loo hayaa si aammin ah, iyadoo la sugayo raadinta macmiilka ama dib u hawlgelinta koontada.
5. Hay'adda maaliyadeed waa inay samayso dedaal kasta oo ay ku raadinayso macmiilka koontadiisu noqotay fadhiidka, waana inay isticmaalaan dhammaan xiriirrada la heli karo iyo kuwa la yaqaan oo ay ku jiraan dadka qaraabadiisa ah, dedaalladaasna waa in la diiwaangeliyaa.
6. Marka la furayo koontada, hay'adda maaliyadeed waa inay si buuxda u diiwaangelisaa xogta macmiilka sida qaraabada iyo dadka kale ee la xiriira.

## Qodobka 51-aad

## Xeer-nidaamiye

Bankiga Dawladda Puntland wuxuu soo saari karaa Xeer-nidaamiyaal, habraacyo iyo wareegtooyin lagu fulinayo qodobada Xeerkan.

## Qodobka 52-aad

## Burin

Waxaa la buriyey Xeer, Xeer-nidaamiye iyo wareegta kasta oo fulineed oo aan waafaqsanayn ama aan la jaanqaadi karin Xeerkan.

## Qodobka 53-aad

## Dhaqan-galka Xeerka

Xeerkani wuxuu dhaqangelayaa marka Golaha Wakiilladu ansixiyo, Madaxweynaha Dawladda Puntland Saxiixo, laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dawladda Puntland.